



CODSI MUTADAWACNIMO AH

Macluumaadka Codsaha			
Magaca Ugu danbeeya:		Magaca Koobaad:	
		M.I.	
Ciwaanka Guriga:		Lambarka Taleefonka Rasmiga ah: ()	
Magaalo:		Gobalka:	Lambarka ZIP-ka:
Emailka (lagama maarmaan):	Lambarka Amniga Bulshada (qasab maaha)		Taariiqda Dhalashada: (Bisha/Maalinta/Sanadka)
Xagee ayaad rabtaa inaad tabarucaad kagaysato? (Dugsiga/Goobta)			
Ma waxaad codsanaysaa inaad tabarucaad kagaysato barnaamij gaar ah? Haday tahay haa, fadlan qor barnaamijka			

Qarsoodinimada Heshiiska/Aqbalaada Mutadawaca

Labada jeerba intay lashaqaynayaan Denver Public Schools iyo kadib ba, mutadawiciinta, shaqo baradka, ama qofkasta oon aqoonsi shaqo wadan oo adeegyo siinaaya Denver Public Schools, waa inuu dhawraa sirmimada dhamaan macluumaadka ah mid qarsoodi ah iyo/ama hawl gaar ah quseeya oo laxariirta Denver Public Schools, ayna kujiraan ayadoon laxadiddayn diiwaanada faylalka shaqaalaha iyo ardayda ("Macluumaadka Qarsoodiga ah") oo qofku helaayo ama heli karo qaab laxariira fulinta shaqada adeegyada mutadawacnimada ah.

Si waafaqsan taas, waxaan aqbalay aana ogolaaday inaan dhawri doono sirmimada Macluumaadka Qarsoodiga ah, aana qaadan doonin ama si khaldan u adeegsan doonin wax Macluumaad Qarsoodi ah marnaba. Uma adeegsan doono macluumaadka qarsoodiga ah waxa arimo faaiido iigaar ah ee hawlo kasta oo kale oo ganacsi ama shaqsi ama qaab kale oo kasoo horjeeda masaalixda Denver Public Schools. Waajibkan ah in ladhawro macluumaadka qarsoodiga ah ayaa sii soconaysa si bilaa xadidaad ah wayna kabaxsanaysaa joojinta heshiiskan.

Waxaan kaloo aqbalayaa aana ogolaanayaa inaan waafaqo dhamaan siyaasadaha ay quseeya ee Denver Public Schools ee laxariira shaqada adeegyadayda mutawacnimo. Anoo ah mutadawac ushaqeeya DPS, waxaan sidoo kale xaqiijinayaa inaan ahayn shaqaalaha Denver Public Schools aanana qaadan doonin wax mushaaraad ah ama gunooyin ah oo laygu siiyo waqtiga iyo adeegyada aan bixinaayo. Waan fahmayaa in magacayga iyo taariikhdayda dhalashada ay arki karaan shaqaalaha DPS inta codsigayga mutadawacnimada laga shaqanaayo.

Waxaan sidoo aqbalay oona ogolaahay, anoo raacaaya codsiga Denver Public Schools ama dhamaadka adeegyadayda, waxaan usoo celinayaa Denver Public Schools dhamaan alaabteeda, gaar ahaana ay kujiraan dukumiintiyada, cajaladaha ama qalabka kale ee kumbuyuutarka ama alaabaha kale ee aan kahaysto ama aniga ila jira kuwaasoo ay kujiraan fikradaha, hawlaha, ra'yiyada ama arimaha ama macluumaadka sirta ah ee ay leeyihiin Denver Public Schools ama shaqaalahooda ama ardaydooda.

Taariiqda	Saxiixa
Taariiqda	Daabac Magaca

Shaacinta iyo Fasaxa Macluumaadka Shaqsiyada Qofka Mutadawaca ah

Faafinta laxariirta Waxbixinta SHAQSIYADA MUTADAWACA

Denver Public Schools ayaa kaqaadan karta Verified Volunteers, 113 South College Avenue, Fort Collins, CO, 80524, (855) 326-1860. www.verifiedvolunteers.com, warbixinta macmiilka iyo/ama waxbixinta baarista macmiilka ("WARBIXIN") taasoo kakooban macluumaadka shaqsiyada oo adigga ugu saabsan taasoo kahadlaysa mutadawacnimada. Verified Volunteers waxay macluumaadyo dheeri ah kaheli karaan dhamaan inta lagu jiro shaqadaada mutadawacnimada si wax looga badalo warbixintaada ayadood lasamayn faafin kale ama ogolaanshob lagaa qaadan.

WARBIXINTA waxaa kujiri kara macluumaad kahadlaaya shaqsiyadaada, sharaftaada guud, astaamahaaga shaqsiga ah iyo qaab nololeedkaaga. WARBIXINTA waxaa kujiri kara, laakiin aan kukoobnayn, warbixinada daynta iyo taariikhdaada dayn qaadashada; diiwanadaada maxkamada dadwaynaha; diiwaanadaada gaadiidka gaariyaasha iyo darawalnimada; taariikhda xaqiijinta social security ga iyo ciwaanka aad dagan tahay, wixii laxariira macluumaadka xanibaado kasta oo sharciga federaalka iyo kan gobalku kugusoo rogeen. Macluumaadkaan waxaa lagasoo qaadan karaa diiwaanada dawlada iyo diiwaanada gaarka looleeyahay, ayna kujiraan shirkadaha daynta, wakaaladaha iyo maxkamadaha garsoorka ee dawlada, iyo ilaha kale ee macluumaadka.

Hadii WARBIXINTA baaritaanka macmiilka laqaado, marka laga reebo qeexitanaka kor kuqoran, nooca iyo qirada WARBIXIN kasta oo noocaas ah waxaa loo adeegsan doonaa tixraacyada shaqsiga ah.

Saxiixa Codsada Mutawacnimada: _____

Taariiqda: _____

Ogolaanshaha Lagu Qaadanaayo Warbixinta Shaqsiyada Mutadawaca

Waxaan akhriyay Faafinta laxariirta Waxbixinta SHAQSIYADA MUTADAWACA oo ay bixiso ("SHIRKAD") iyo Ogolaanshaha Lagu Qaadanaayo Warbixinta Shaqsiyada Mutadawaca. Anoo hoos saxiixaaya, waxaan halkaan kafasaxayaa diyaarinta Verified Volunteers, ay diyaariyaan wakaalada warbixinta amacmiilka oo kutaala 113 South College Avenue, Fort Collins, CO, 80524, (855) 326-1860, www.verifiedvolunteers.com, warbixinada shaqsiyada ee igu saabsan iyo faafinta warbixinada noocaas ah oo lasiiyo SHIRKADA iyo wakiiladeeda, si looga caawiyo SHIRKADA gaarista go'aan laxariira mutadawacnimada oo anigga uquseeya xili kasta kadib markay hesho fasaxaan iyo dhamaan mudada mutadawacnimadaydu socoto, ilaa inta sharcigu ogolyahay. Markay halkaan marayso, waxaan halkaan kafasaxayaa, anoo wax shuruudo ah kuxirayn, wax wakaalad gobalka ama federaalka ah ee fulinta shaqrciga ama maxkamad, xarunta waxbarashada, wakaalada diiwaanka gaariyaasha, laanta daynta ama laan kasta oo adeegyada macluumaad bixisa ama kayd macluumaad, inay siiyaan dhamaan macluumaadka iyo midkaasta oo kamid ah macluumaadkayga Verified Volunteers iyo/ama SHIRKADA qudheeda, waxaana ufasaxayaa Verified Volunteers inay macluumaadka noocaas ah siiso SHIRKADA. Waxaan aqbalayaa in koobiga ("fakiska"), midka elektarooniga ah ama sawirka koobiga ogolaanshahaan uu yahay mid sax ah si lamid ah kan orijinaalka ah.

Waxaan xaqiijinayaa helitaanka koobiga ay so dirtay Laanta Difaaca Dhaqaalaha Macmiilka ee "MACLUUMAADKA KOOBAN EE XAQUUQDAADA KUCAD SHARCIGA WARBIXINTA SAXAN EE CADAALADA AH."

Magaca Codsadaha Mutdawaca (Oo daabacan _____)

Saxiixa Codsada Mutawacnimada: _____ Taariiqda: _____

For Office Use Only

Ano ah wakiil katirsan Denver Public Schools uu soo gaaray dukumiintigaan, waxaan codsaday lana itusay aqoonsiga sawirka leh ee mutadawaca waxaana marqaati ka ahaa saxiixa dukumiintiga.

Taariiqda:

Saxiixa:

Taariiqda:

Daabac Magaca:

Macluumaadka Kooban ee Xaquuqdaada kucad Sharciga Warbixinta Saxda h ee Cadaalada kudhisan

Sharciga Warbixinta Saxda ah ee Cadaalada ah e Federaalka (FCRA) ayaa dhawraaya saxnaanta, cadaalada, iyo qarsoodnimada macluumaadka kujira faylalka wakaaladaha warbixinada kasoo aruursha macmiilka. Waxaa jiro noocyo badan oo wakaaladaha warbixinta macmiilka ah, ayna kujiraan laanta daymaha iyo wakaalado shaqooyin gaar ah qaabilsan (sida wakaaladaha iibsha macluumaadka kusaabsan taariikhda qorista jeegaga, diiwaanada caafimaadka, iyo diiwaanada taariikhda kirada gurigga). Halkaan waxaa kuqoran macluumaadka kooban ee xaquuqahaaga ugu waawayn oo kucad sharciga FCRA. Wixii macluumaad dheeri ah, ayna kujiraan macluumaadka kusaabsan xaquuqahaaga dheeriga ah, booqo www.consumerfinance.gov/learnmore ama fariin udir: **Consumer Financial Protection Bureau, 1700 G Street N.W., Washington, D.C. 20552.**

Waa qasab in lagu sheego hadii macluumaadkaaga kujira faylka loo adeegsaday hawlo kaadhan ah adigga. Qofkasta oo adeegsada warbixinta daynta ama nooc kale oo macmuulaadka macmiilka ah si uu udiido codsigaaga qaadashada daynta, caymiska, ama shaqada - ama qaado talaabo kale oo kaadhan ah adigga - waxaa qasab ah inuu kusheego, waana inuu kusiiyaa magaca, ciwaanka, iyo nambarka taleefanka wakaalada siisay macluumaadka.

Waxaad xaq uleedahay inaad ogaato waxa kuqoran faylkaaga. Waxaad codsan kartaa aadna qaadan kartaa dhamaan macluumaadka adiga kugu saabsan ee kujira faylalka wakaalada warbixinta macmiilka ("Faylkaaga faafinta"). Waxaa lagaa doonayaa inaad keento aqoonsi sax ah, kaasoo ay kujiri karaan nambarka Social Security. Marar badan, faafinta ayaa ah mid lacag la'aan ah. Waxaad helayaa in macluumaadka bilaash lagugu siiyo hadii:

- uu qof talaabo khaldan kaaqaado sabab laxariirta macluumaad kuqoran warbixintaada daynta;
- aad noqoto dhibanaha xatooyada aqoonsiga aadna galiso faylkaaga digniinta jiritaanka khiyaanada;
- faylkaagu kakooban yahay macluumaad khaldan sabab laxariirta khiyaano lagu sameeyay;
- aad caawimaad kaqaadato dawlada;
- aad tahay qof shaqo la'aan ah laakiin aad rajaynayso inaad shaqo hesho 60 maalmood gudahood.

Waxaa intaas siidheer, dhamaan macaamiishu waxay aq uleeyihiin inay halmar helaan macmuulaadka oo bilaash ah 12 kii bilood ba mar markay codsadan ayna kaqaataan laanta qaran ee daymaha iyo wakaaladaha qaran ee sida gaarka ah u aruursha warbixinada macmiilka.

Booqo www.consumerfinance.gov/learnmore si aad macluumaad dheeri ah uhesho.

Waxaad xaq uleedahay inaad inaad codsato buundada daynta. Buundooyinka dayntu waa tirada kooban ee inta dayn aad qaadan karto ayadoo laga fiirinaayo macluumaadka laga helay laanta daynta. Waxaad kacodsan kartaa buundada daynta wakaaladaha warbixinta macmiilka ee abuura buundooyinka ama qaybiya buundooyinka loo adeegsado daymaha hantida guryaha ladagan yahay, laakiin waa inaad qarashkeeda dhiibtaa. Lacagaha la isdhaafsado ee daynta guryaha qaarkood, waxaad helayaa macluumaadka cabirka daynta si bilaash ah waxaad kahelaysaa qolada daynta gurigga kusiisay.

Waxaad xaq uleedahay inaad dood kakeento macluumaad kala dhiman ama aan sax ahayn. Hadaad macluumaad ka aqoonsato faylkaaga kaasoo kala dhiman ama khaldan, aadna usheegto wakaalada warbixinta macmiilka, waxaa qasab ku ah wakaalada inay baarto ilaa in doodaadu tahay maahaa mid been ah. Booqo www.consumerfinance.gov/learnmore si aad uhesho sharaxaada hanaanada dood kakeenida macluumaad kala dhiman.

Wakaaladaha warbixinta macmiilka waxaa qasab ku ah inay saxaan ama tiraan macluumaadka khaldan, kala dhiman, ama aan laxaqiijin. Macluumaad khaldan, kala dhiman ama aan laxaqiijin ee in latiraa ama lasaxaa, caadiyan 30 maalmood gudahood. Hase yeeshee, wakaalada warbixinta macmiilku waxay sii wadi kartaa inay macluumaadka soo gudbisoo kaasoo ay xaqiijisay inuu yahay mid sax ah.

Wakaaladaha warbixinta macmiilku masoo gudbin karaan macluumaad dhacay oo xun. Inta badan, wakaalada warbixinta macmiilku masoo gudbin karto macmuulaad xun kaasoo dhacay kahor todobo sano, ama warbixinta musalafida macmiilka oo dhacday 10 sano kahor.

Galitaanka faylkaaga waa mid xadidan. Wakaalada warbixinta macmiilka ayaa soo gudbin karta macluumaad kugu saabsan una gudbin karta kaliya dadka baahida dhabta ah uqaba -- caadiyan in laga baaraan dago codsiga dayn bixiyaha, shirkada caymiska, qof wa shaqaalaysiinaaya, mulkiilaha gurigga, ama ganacsi kale. FCRA ayaa si gaar ah usheegaaya dadka baahiyaha dhabta ah uqaba helitaanka macluumaadka.

Waxaa qasab ah inaad ogolaanshahaaga siiso warbixinada si loosiyo dadka wax shaqaalaysiisa. Wakaalada warbixinta macmiilku mabixin karto macluumaad adigga kugu saabsan si ay usiiso shirkad wax shaqaalaysiisa, ama shirkad laga yaabo inay shaqo bixiso, adoon bixin ogolaansho qoran oo lasiiyo shirkada loo shaqaynaayo. Ogolaanshaha qoran inta badan looma baahna marka shirkadu tahay kuwa taraagyada. Wixii macluumaad dheeri ah, booqo www.consumerfinance.gov/learnmore.

Waxad yarayn kartaa "qiimaynta hore" ee daynta iyo caymiska aad hesho ayadoo laga fiirinaayo macluumaadka kuqoran warbixintaada daynta. "Qiimaynta hore" ee aan qareenka looqabsan ee daynta iyo caymiska waa inuu kujiraa namabarka taleefanka lacag la'aanta ah ee aad wici karto hadaad doorato inaad magacaaga iyo ciwaankaaga kasaarto liiska ay adeegyadaan kujiraan. Waxaad didi kartaa warbixinta wadanka dhan ee laamaha daynta adoo wacaaya 1 888 5OPTOUT (1 888 567 8688).

Waxaad magdhawga dhibaataada lagaystay kadalban kartaa kuwa kuxad gudba ogolaanshahaaga. Hadii wakaalada warbixinta macmiilka, ama, mararka qaar, qof adeegsanaaya warbixinada macmiilka ama bixiyaha macluumaadka siinaaya wakaaladaha warbixinta macmiilka uu kuxad gudbo sharciga FCRA, waxaad kadacwayn kartaa maxkamad gobal ama heer federaal ah.

Dadka dhibanaha u ah tuugada aqoonsiga iyo shaqaalaha shaqada militariga kujira waxay leeyihiin xaquuq dheeri ah. Wixii macluumaad dheeri ah, booqo www.consumerfinance.gov/learnmore.

Gobalada ayaa fulin kara sharciga FCRA, gobolo badana waxay leeyihiin sharciyadooda ugaarka ah ee warbixinta macmiilka. Mararka qaar, waxaa macquul ah inaad leedahay xaquuq dheeri ah sida kucad sharciga gobalka. Wixii macluumaad dheeri ah, laxariir wakaaladaada gobalka ama deegaanka ee difaaca macmiilka ama Qareenka Guud ee Gobalkaaga. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xaquuqdaada heer federaal, laxariir:



Wixii laxariira su'aalo ama walaacyo kusaabsan:	Fadlan laxariir:
1. a. Bngida, ururada lacagaha lagu kaydsado, iyo midawga dayn bixiyaasha oo leh hati maguurto ah oo dhan \$10 bilyan iyo dadka lashaqeeya.	a. Bureau of Consumer Financial Protection 1700 G Street NW Washington, DC 20552
b. Wakaaladaha noocaas ah ee aan ahayn bngida, ururada lacagaha lagu kaydsado, iyo midawga dayn bixiyaasha ayay tahay inay liiska kujiraan ayagoo lagu daraayo Laanta:	b. Gudigga Gancsiga Federaalka: Xarunta Jawaab celinta Macmiilka - FCRA Washington, DC 20580 (877) 382-4357
2. Marka aysan kujirin qaybta 1 ee kor kuxusan:	
a. Bangiyada qaranka, ururada kaydka ee federaalka, iyo laamaha federaalka iyo wakaaladaha federaalka ee bangiyada shisheeye	a. Xafiiska Xakameeyaha Lacagta, Kooxda Caawimaada Macmiilka 1301 McKinney Street, Suite 3450, Houston, TX 77010-9050
b. Bangida xubinta ka ah gobalka, laamaha iyo wakaaladaha bangida shisheeyaha (marka laga reebo laamaha federaalka, wakaaladaha federaalka, iyo laamaha caymiska leh ee bangida shisheeye ee gobalka kuyaala), shirkadaha ganacsi ee daynta baxsha oo ay leyihiin ama maamulaan bangida shisheeye, iyo ururada kushaqeeya farqada 24 ama 25A ee Sharciga Kaydka Federaalka.	b. Xarunta Caawimaada Macmiilka ee Kaydka Federaalka PO Box 1200 Minneapolis, MN 55480
c. Bangiyada caymiska leh ee aan xubinta ka ahayn, Laamaha Bngida Gobalka ee Caymiska leh iyo Bangida Shisheeye, iyo ururada kaydka lacagta ee caymiska kahaysta gobalka.	c. arunta Jawaab celinta Macmiilka FDIC, 1100 Walnut Street, Box #11, Kansas City, MO 64106
d. Midawga Dayn Bixiyaasha Federaalka	d. Xafiiska Difaaca Macmiilka ee Maamulka Midawga Dayn Bixiyaasha Qaran (OCP) Waaxda Waafiqida Sharciga ee Macmiilka iyo Iskuxirka (DCCO), 1775 Duke Street, Alexandria, VA 22314
3. Gaadiidka hawada	Kaaliyaha Gudigga Guud ee Fulinta Sharciga Diyaarahaha iyo Hanaanadiisa, Qaybta difaaca diyaaraha ee Macmiilka Waaxda Gaadiidka, 1200 New Jersey Avenue SE, Washington, DC 20590
4. Dayn bixiyaasha Kusuqul Leh Kormeerka Gudigga Gaadiidka	Xafiiska Hanaanada, Gudigga Kormeerka Gaadiidka, Waaxda Gaadiidka 395 E Street, SW, Washington, DC 20423
5. Dayn Bixiyaasha Kusuqul Leh Sharciga Baakadeeyaasha iyo Xarumaha Bakhaarada	Kormeeraka Maamluka Ugu Dhaw ee Baakadeeyaasha iyo Kaydadka Bakhaarada
6. Shirkadaha Maalgashiga Ganacsiyada Yaryar	Kuxigeenka Maamulaha Capital Access, Maamulka Gancsiyada Yaryar ee Maraykanka 409 Third Street, SW, 8th Floor, Washington, DC 20416
7. Dalaaleeyda iyo Qandaraas layaasha	Gudigga Amaanaadka iyo Isdhaafsiga, 100 F St NE, Washington, DC 20549
8. Bangida Dhulka ee Federaalka, Ururada Bangida Dhulka ee Federaalka, Bngida Gacanta Sadexaad ee Daynta ee Federaalka, iyo Ururada Daynta Waxsoosaarka	Maamulka Daynta Beerta, 1501 Farm Credit Drive, McLean, VA 22102-5090
9. Tafaariiqeeyda, Shirkadaha Maaliyada, iyo Dhamaan Dayn Bixiyaasha Kakle oo dhan ee Anan Kor Lagu Qorin	Xafiis Gobaleedka FTC ee gobalka uu dayn bixiyuhu kashaqeeyo ama Gudigga Gancsiga Federaalka: Xarunta Jawaab celinta Macmiilka - FCRA, Washington, DC 20580 (877) 382-4357

Macmiilka ayaa xaq uleh inuu helo joojinta amaanada

Waxaad xaq uleedahay inaad saarto "xanibaada amaanada" warbixintaada daynta, taasoo faaiido u ah wakaalada warbixinta macmiilka inay siidayso macluumaadka warbixinta dayntaada doon ogolaansho siin. Xanibaada kirada waxaa lagu naqshadeeyaa in looga hortago ansixinta daynta, daymanka, iyo adeegyada ayagoo kuqoran magacaaga doon ogolaansho bixin. Hase yeeshee, waa inaad ogaataa adeegsiga xanibaada amaanada si aad umaamusho ida helaya macluumaadka shaqsiga ah iyo ka dhaqalaha ee kuqoran warbixintaada daynta uu dib udhigi karo, carqaladayn karo, ama ufaaiidayn karo ansixinta waqtiga saxda ah ee codsi kasta oo kuxigga ama codsi aad ugudbisay qaadashada dayn cusub, amaah, daynta guryaha, ama koonto kale oo kasta taasoo laxariirta balaarinta daynta. Badalka xanibaada amaanada, waxaad xaq uleedahay inaad saarto digniinta hore ama dheeri ah oo laxariirta jiritaanka khiyaano lagu samaynaayo faylkaaga daynta si lacag la'aan ah. Digniinta hore ee khiyaanada ayaa ah 1 sano oo digniin ah taasoo lasaaro faylka daynta ee macmiilka. Markaad aragto digniinta khiyaanada oo saaran faylkaaga daynta macmiilka, ganacsiga ayaa laga doonayaa inuu qaado talaabooyin si uu uxaqiijiyo aqoonsiga macmiilka kahor intuuusan dayn cusub bixin. Hadaad tahay dhibane lagula kacay xatooyo dhanka aqoonsiga ah, waxaad xaq uleedahay inaad hesho digniinta khiyaanada lasaaro faylkaaga oo dheeri ah, taasoo ah digniinta tuugada oo soconaysa 7 sano. Xanibaada amaanadu maqusayso shaqsi ama shirkad, ama cid lashaqaysa, ama kooxo wakaalado ah oo wakiil ka ah qof ama shirkad, taasoo aad uleedahay koonto taasoo codsanaysa macmuulaad kusaabsan warbixintaada daynta sababo laxariira dib u eegista ama aruurinta koontadaada. Dib u eegista koontada waxaa kujira nashaadaad laxariira ilaalinta koontada, duljoogtaynta, kordhinada laymanka daynta, iyo cusboonaysiinada iyo hormarinada koontada.